

# Macluumaad loogu talagalay adiga oo ku cusub Iswiidhan oo leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah



Hay'adda dawladeed ee ka qaybgelinta, 2023

**Ku socota adiga oo ku cusub Iswiidhan oo leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah**

**Lambar:** 2023:8

**ISBN:** 978-91-987834-9-0 (daabacaadda)

**ISBN:** 978-91-987834-8-3 (pdf)

**Jaldi:** Johnér Bildbyrå

Daabacaaddan waxaa laga soo dejiisanayaa hey'adda dawladeed boggeeda intarnatka [www.mfd.se](http://www.mfd.se).

Qaab doorasho kale ah waxaa laga dalban karaa Hay'adda dawladeed ee ka qaybgelinta.

Hay'adda dawladeed ee ka qaybgelinta

**Cinwaanka:** Box 1210, SE-172 24 Sundbyberg, Sweden

**E-mail:** [info@mfd.se](mailto:info@mfd.se)

**Telefoonka:** 08-600 84 00



**Yaa warbixintan  
ku jiheysan tahay?**

Macluumaadkan wuxuu ku jiheysan yahay adiga oo leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah iyo sidoo kale:

- codsaday magangalyo
- la siiyay sharci degganaansho sida waafaqsan go'aanka Midowga Yurub ee qaxoonti badan
- dalka ku cusub oo Iswiidhan ka helay sharci degganaansho oo ku meel gaar ah ama joogto ah.

Qoraalkan macluumaadka ee yar waxaad ka akhrin kartaa noocyada hawlaha taageero iyo alaabta caawimaad ee aad codsan karto gudaha Iswiidhan.

## **Sidee ayaa loo isticmaalayaa qoraalka yar ee macluumaadka?**

Waxaa laga fikiray in adiga iyo qaraabadaadu aad isticmaasaan.

## **In qof cusub lagu ahaado Iswiidhan oo lala noolyahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah**

Iswiidhan waxay ku xirantahay Qaramada Midoobey qaraarkeeda xuquuqda dadka leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah. Iswiidhan sharciyadeeda iyo qawaaniinteedu sidaas darteed waxay tixgeliyaan in dadka leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah ay ka qaybqaadasho ku lahaadaan bulshada.

In la leeyahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah micnaheedu waxay ahaan kartaa in aad u baahantahay taageero si aad uga qaybqaadato bulshada qaab la mid ah sida dadka kale. Haddii aad u baahantahay taageero si aad u dabari karto maalintaada waxaad xaq u yeelan kartaa inaad caawimaad ka hesho bulshada.

Hoos u dhac awoodda laxaadka ah waxay ahaan kartaa:

- **jir ahaan**, tusaale ahaan in uu kugu adagyahay dhaqdhaqaaqu, aragtida ama maqalka
- **maskaxiyan**, tusaale ahaan in aad qabto cudur dhimirka ah.
- **caqliyan**, tusaale ahaan in aad u baahantahay wakhti dheeraad ah si aad u fahanto ama u barato waxyaabo cusub
- **garaadka**, tusaale ahaan in aad u baahantahay taageero si aad u raacdo tilmaamo ama u qorshayso wakhtigaaga.

Waxaa jira hoos u dhacyo awoodda laxaadka ah oo kale oo aan ahayn kuwa kor lagu soo sheegay. Hoos u dhac awoodda laxaadka waa wax ay dhici karto inaad ku dhalatay ama kugu yimi intii nololahaada aad ku jirtay. Adigu waxaad lahaan kartaa hal ama dhowr ah hoos u dhacyo awoodda laxaadka ah. Waxay noqon kartaa mid joogto ah ama ku meel gaar ah. Hoos u dhacyo badan oo awoodda laxaadka ah maaha wax muuqda. In aad u baahantahay taageero iyo in kale waxay ku xirantahay nooca hoos u dhaca awoodda laxaadka ee aad leedahay iyo xaaladaada nololeed.

## **Bulshada mas'uuliyadeeda, xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga**

Dhammaan dadka leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah waxay codsan karaan taageero kala duwan. Adiga laf ahaantaada ayay tahay inaad raadiso macluumaad oo codsato taageerada. Xitaa haddii aad xaq u leedahay inaad codsato taageero gaar ah maaha mar walba wax hubaal ah in aad helayso taas. Taageerada laga helo bulshada waxaa laga bixiyaa lacagta cashuurta. Dhammaan dadka awoodda ee shaqeeya ayaa sida ku cad sharciga Iswiidhan bixiya cashuur oo sidaas ku kaalmeeya tusaale ahaan daryeelka bukaanka, waxbarashada, jidadka iyo guryaha.

## **Carruurta iyo dhalinyarada ka yar 18 jir ee ah bilaa waalid**

Haddii aad timi Iswiidhan adiga oo ah bilaa waalid ama qof kale oo mas'uul kaa ah markaas degmada ayaa mas'uul ka ah qaabilaadaada. Adigu waxaad xaq u leedahay wakiil ilaaliya danahaaga kaas oo mas'uul ka ah qaar ka mid ah waajibaadka caadi ahaan ay waalidku sameeyaan. Wakiilka ilaalinayaa danahaaga ayay waajib ku tahay go'aaminta arrimahaaga sharcian, dhaqaale iyo shakhsiyan. Wakiilkaaga ayaa xitaa kaa caawinaya la xiriirka hey'adaha dawladeed iyo codsiga noocyada taageero ee kala duwan.

## Taageero noocee ah ayaad heli kartaa?

Halkan ayaad ka akhrin kartaa sida adigaaga leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah aad samaynayso si aad u hesho taageero marka aad:

- raadinayso shaqo, ama aad heshay shaqo
- raadinayso guri ama aad heshay guri u baahan in la haboonaysiiyo
- u baahato taageero dhaqaale, sababtoo ah in tusaale ahaan aanad awoodin inaad shaqayso sababtoo ah hoos u dhaca awoodda laxaadkaaga
- u baahato daryeelka caafimaad iyo bukaan, daryeel ilko iyo alaabta caawinta
- rabtid inaad waxbarato ama haysato ilmo leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah oo bilaabi doona iskoolka una baahan taageero
- u baahato taageero gudaha guriga ama maalinle ah.

Adigu waxaad xitaa codsan kartaa taageero waafaqsan Sharciga adeega bulshada (SoL) taas oo lagu magacaabo gargaar. Gargaarku wuxuu noqon karaa mid lacag iyo noocyo kale oo caawimaad ah, tusaale ahaan daryeelka caafimaadka ama adeega guriga.



# Hay'adaha dawladeed ee muhiimka ah inaad ogaatid

Dalka Iswiidhan waxaa ka hawlgala hay'ado dawladeed oo badan. Waa kuwan dhowr si gaar ah muhiim u ah in la ogaado.

<b>Hey'ad dawladeed</b>	<b>Sharraxaad</b>
<b>Xafiiska Shaqada</b>	Caawiyaa adiga aan haysan wax shaqo ah oo hubiyaan in kuwa bilaa shaqada ah iyo kuwa shaqada bixiyaa ay raacaan qawaaniinta.
<b>Qasnadda Caymiska</b>	Go'aamisaa oo bixisaa kaalmada iyo gunooyinka dhaqaale ee kale.
<b>Hey'adda Socdaalka</b>	Baartaa codsiyada ka yimi dadka raba inay ku noolaadaan Iswiidhan, wax ka bartaan, ka shaqeeyaan, u yimaadaan booqasho, ka raadsadaan magan-gelyo ama helaan dhalashada Iswiidhishka. Waa Hey'adda Socdaalka ta go'aamisa haddii aad helayso sharci degganaansho. Sharci degganaansho wuxuu ahaan karaa mid wakhti xadaysan ama joogto ah.
<b>Hey'adda Cashuuraha</b>	Qaadaa cashuuraha, dabartaa diiwaan-gelinta dadweynaha oo bixisaa kaarka aqoonsiga ee adiga ah qof ka diiwaan-gashan gudaha Iswiidhan.

Iswiidhan waxay u qaybsantahay gobolo iyo degmooyin. Halkan ayay ku soo socotaa warbixin ku saabsan waxa ay tahay mas'uuliyadoodu:

<b>Gobolada iyo degmooyinka</b>	<b>Sharraxaad</b>
<p><b>Gobolada:</b> Daryeelka caafimaadka iyo bukaanka isla markaana qalabka caawinta</p>	<p>Dalka Iswiidhan daryeel caafimaadka iyo bukaanka wuxuu u qeybsan yahay 21 aag oo lagu magacaabo gobolo. Gobol walba waxaa ku yaala isbitaal iyo xarumo daryeel oo kale, tusaale ahaan ruggaha caafimaadka. Gobolku wuxuu kaa caawin karaa inaad hesho qalabka caawinta ee kala duduwan haddii aad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah. Gobolku wuxuu xitaa kaa caawin karaa haddii aad maskax ahaan aanad dareemayn wanaag.</p>
<p><b>Degmooyinka:</b> Iskoolka, xanaanada carruurta, xanaanada waayeelka, taageero bulsho iyo hoyga dadka dalka ku cusub</p>	<p>Iswiidhan waxay u qaybsan tahay qaybo yar oo lagu magacaabo degmooyin. Iswiidhan waxa ku yaala 290 degmo oo kala duwan. Degmooyinka ayaa mas'uul ka ah in dadka ku nool degmada la siiyo iskool, xanaanada carruurta iyo xanaanada waayeelka, LSS iyo SoL.</p>

## In la codsado taageero

Taageerada ay bulshadu kugu casuumi karto waxaa laga helaa meelo kala duwan. Adigu waa inaad la xiriirto hey'adda dawladeed ee saxda ah ama hawshaa iska leh si aad u hesho taageero sax ah. Adigu waa inaad codsato taageeradaas ka hor si aad u hesho.

Haddii aad u baahantahay taageero ama caawimaad, waa in adigu aad la xiriirto hey'adda dawladeed ee aad uga baahantahay taageerada. Taas waxaad samayn kartaa adiga oo u maraya in aad:

- u dirto ii-mayl ama warqad caadi ah
- wacdo
- booqato hey'adda dawladeed ama si dijitaal ah dhinaca boggooda intarnatka.

Waa muhiim inaad u sheegto hey'adahaas dawladeed haddii aad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah. Markaas ayaa hey'adahaas dawladeed kuu sheegi karaan nooca taageero ee aad codsan karto iyo sida aad samaynayso. In aad hoos u dhacaaga awoodda laxaadka u sheegto hey'adahaas dawladeed wax raad ah ma ku yeelanayso fursadaada in aad joogto gudaha Iswiidhan.

Qasnadda Caymiska, Hey'ada Cashuuraha, Hey'adda Hawlgabka iyo Xafiiska Shaqada waxay si wadajir ah u leeyihiin xafiis adeeg oo lagu magacaabo Dawladda xarunteeda adeega oo halkaas ayaad la xiriiri kartaa. Qaar badan oo xafiisyada adeegga ah waxaa ka shaqeeya shaqaale kugu caawin kara

luqado dhowr ah oo aan ahayn Iswidhish. Weydii hawl-wadeen jooga xafiiskaaga adeegga ee maxaliga ah haddii aad u baahantahay turjubaan. Qaar ka mid ah xafiisyada adeegga waxaad xitaa kala xiriiri kartaa arrimaha ay maamusho Hey'adda Socdaalka. Waxaa lagaaga baahanyahay inaad tusto dukumentigaaga aqoonsi si aad u caddayso qofka aad tahay.

Hey'adda Socdaalka waxey sidoo kale leedahay xarumo adeeg oo gaar u ah, kuwaas oo aad la xiriiri karto.

### **Macluumaadka shakhsiga iyo dukumentiga aqoonsiga**

- **Diiwaan-gelinta dadweynaha** – Waa inaad ka diiwaan-gashanaato cinwaanka aad ku nooshahay, taas waxaa lagu magacaabaa diiwaan-gelinta dadweynaha. Qofka guuray waa inuu cinwaankiisa cusub wargeliyo Hey'adda Cashuuraha. Tani waxay khuseysaa qofkaaga dalka ku cusub.
- **Lambarka shakhsiga ah** – Waa lambar Hey'adda Cashuuraha siiso dadka ka diiwaan-gashan dalka Iswiidhan si loogu aqoonsado iyaga. Tani waxay khuseysaa qofkaaga dalka ku cusub.

- **Lambarka isku dubbaridka** – Waa lambar aqoonsi oo shakhsiyan ah kaas oo fududeeya marka aad tusaale ahaan la xiriiro hey'addaha dawladda ama furanayso xisaab bangi. Sidan ayaa khuseysa adigaaga ah magan-gelyo doon ama qaxoonti soo qaxay.

## Turjumid

Xilliga dhammaan la xiriirka hey'adaha dawladeed, degmo iyo daryeelka bukaanka waxaad xaq u leedahay turjubaan. Adigu waxaad badanaaba u baahantay inaad ka hor ballansato oo turjubaanka luqadda dhagoolayaasha waxaa loo baahanyahay in mar walba ka hor la ballamiyo.

## Dhib dagaal iyo nuglaan

Adigaaga la nool hoos u dhac awoodda laxaadka ah waxaad si dheeraad ah ugu nuglaan kartaa oo khatar ugu jirtaa in ay dhib kaa soo gaarto dagaal ama ka ganacsiga dadka. Haddii qof kugu dhibay ka ganacsiga dadka wuxuu qofkaas galay dembi. Haddii aad ku jirto xaalad dagaal ama dhibaato waa inaad la xiriiro booliiska.

**Magan-gelyo doon**

## Qofkee ah magan-gelyo doon?

Waxaad tahay magan-gelyo doon marka aad gabood ka codsatay dalka Iswiidhan. Sidaas ayaad tahay ilaa iyo aad helayso go'aan ah in laguu oggolaaday inaad joogto Iswiidhan ama laguu diiday.



### Shaqo

Magan-gelyo doon ahaan waa inaad is masruufto haddii aad awooddo, tusaale ahaan lacag kayd ah ama shaqo.

Haddii aad xaq u leedahay inaad shaqayso waxaad u baahantahay inaad caddayn taas muujinaysa aad ka hesho Hey'adda Socdaalka. Waxaad caddayntaa ka akhriin kartaa koodhka QR ee ku yaalla kaarkaaga LMA. Waxaad xitaa u baahantahay lambarka isku-dubbaridka kaas oo aad ka helayso Hey'adda Cashuuraha. Markaas ka dib ayaad bilaabi kartaa shaqo. Keligaa ayaad shaqo diyaarsan kartaa. Iska diiwaan-geli Xafiiska Shaqada iyadoo aad u marayso Dawladda xarunteeda adeegga marka aad raadinayso shaqo.



### Hoy

Magan-gelyo doon ahaan waxaad xaq u leedahay inaad codsato hoy haboon haddii aad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah.

Haddii aanad rabin inaad ku noolaato halka Hey'adda Socdaalka ay soo bandhigtay, markaas waa inaad diyaarsato oo keligaa bixiso lacagta hoygaaga. Meesha aad doorato waxay raad ku yeelan kartaa xaqaaga taageero dhinaca Sharciga qaabilaadda magan-gelyo doonka (LMA). Haddii aad rabto in lagaa caawiyo hoyga, Hey'adda Socdaalka ayaa diyaarin karta hoy ku meel-gaar ah inta lagu jiro wakhtiga aad sugayso go'aanka codsigaaga magan-gelyo doonka.

### **Carruurta iyo dhalinyarada ka yar 18 jir ee ah bilaa waalid**

Haddii aad ka yartahay 18 jir oo aad timi Iswiidhan adigoo bilaa waalid ah markaas degmada aad ku nooshahay ayaa diyaarinaysa hoy ku haboon baahiyahaaga.



### **Lacag dhaqaale ah**

Haddii aanad is masruufi karin waxaad fursad u haysataa inaad taageero ka codsato Hey'adda Socdaalka sida waafaqsan Sharciga qaabilaadda magan-gelyo doonka (LMA). Haddii taageerada aad ka hesho Hey'adda Socdaalka aanay kugu filnayn waxaad codsan Hey'adda socdaalka ka codsan kartaa taageero gaar ah:

- Haddii aad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah taas oo taageerooyinkaaga kale aanay ku filnayn waxaad codsan kartaa kaalmo gaar ah. Waxay ahaan kartaa tusaale ahaan muraayadaha indhaha ama qalabka caawinta.



La xidhiidh Hey'adda Socdaalka si aad u codsato taageerooyinka kala duwan oo aad u hesho warbixin dheeraad ah. Waa Hey'adda Socdaalka ta go'aamisa haddii aad heli karto lacag.

### **Carruurta iyo dhalinyarada ka yar 18 jir ee ah bilaa waalid**

Haddii aad ka yartahay 18 jir oo aad timi Iswiidhan adigoo bilaa waalid ah markaas waxaa ku khuseeya qawaaniin la mid ah sida dhammaan caruurta iyo dhalinyarada kale ee u baahan taageero iyo ilaalin.



### **Daryeelka caafimaadka iyo bukaanka iyo daryeelka ilkaha**

Dalka Iswiidhan waa ugu horeyn gobolada kuwa mas'uul ka ah daryeelka caafimaadka iyo bukaanka iyo daryeelka ilkaha.

Marka aad codsato magan-gelyo, rugta caafimaadka ayaa kugu casuumaysa baaritaan caafimaad. Baaritaankan wuxuu keenayaa inaad caawimaad wakhti hore ka hesho daryeelka bukaanka haddii aad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka.

U sheeg daryeelka bukaanka haddii aad leedahay ama u malaynayso inaad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah si aad u hesho taageerada aad u baahantahay. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo turjubaanada waxaa waajib ku ah xog qarinta sirta oo ma loo oggola inay hey'addaha dawladeed ee kale u sheegaan in

aad booqatay daryeelka caafimaadka. Waxa aad sheegto micnihii raad ma ku yeelanayso codsigaaga magan-gelyo.

Qof weyn ahaan waxaa siinayaa daryeelka caafimaad iyo daryeelka ilko ee aan la sugi karin.

### **Halka aad la xiriirayso haddii aad bukooto**

La xiriir ugu horeyn rugta caafimaad ee ugu dhow haddii aad bukooto. Rugta caafimaadka ayaad ka heli kartaa caawimaada dhanka daryeel fudud. Wac 1177 haddii rugtaada caafimaadka xirantahay ama aad ku weydo telafoonka. Markaas ayaad la hadlaysaa kalkaaliye caafimaad oo ku siin kara talooyin. La xiriir Daryeelka ilkaha ama rug dhakhtar ilko oo kale haddii aad u baahantahay daryeel ilko. Isbitaalka waxaad la xiriiraysaa haddii aad si degdeg ah u bukooto. Wac 112 haddii adiga ama qof kale si halis ah u bukoodo, dhaawac xun jiro oo loo baahdo ambalaans.

### **Safarka bukaanka**

Haddii ay kugu adagtahay in aad keligaa tagto daryeelka caafimaadka waxaad ballansan kartaa oo aad helaysaa magdhabidda safar bukaan oo lagu aado rug caafimaad ama isbitaal. Waxaad magdhowga codsanaysaa ka dib, laakiinse waxaad u baahantahay inaad ka hor sii codsato oggolaanshaha safarka bukaanka. La xiriir daryeel bixiyahaaga si aad u ogaato nooca safarada aad ku heli karto magdhow.

## **Carruurta iyo dhalinyarada ka yar 18 jir**

Carruurta ka yar 18 jir waxay xaq u leeyihiin dhammaan daryeel bukaan iyo daryeel ilko. Adigaaga ka yar 18 jir waxaad xitaa heli kartaa baxnaanis, taas oo micnaheedu tahay taageero iyo tababar si aad u dabari karto nolosha maalinlaha ah sida ugu fiican ee suurtagal ah. La xiriir rugtaada caafimaada si aad ula xiriirto baxnaaniska.



## **Iskoolka**

Dalka Iswiidhan iskoolku waa u bilaash dhammaan carruurta iyo ardayda. Carruurta magan-gelyo doonka waxay xaq u leeyihiin inay dhigtaan iskoolka laakiin ma ku aha khasab. La xiriir degmadaada si aad boos iskool ugu hesho ilmahaaga.

Adiga ayaa ilmahaaga u dooran kara iskool ku yaal degmada aad ku nooshahay. Hey'adda Socdaalka ayaa ku caawin karta haddii aad u baahato taageero ah in aad ilmahaaga qorto iskool. Iskoolka ayaa go'aaminaya fasalka ilmahaagu bilaabayo. Tani waxay ku xirantahay da'da ilmahaaga iyo aqoonta hore.

Badankooda ardayda leh hoos u dhac ah awoodda laxaadka ee jir ahaan, maskax ahaan iyo caqli ahaan waxaa lagu qaabilaa dugsiiga hoose-dhexe iyo ka sare ee caadiga ah. Waxa xitaa jira qaabab iskool oo kale looguna talagalay carruurta leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah.

## **Dugsi hoos-dhexe iyo dugsi sare oo la haboonaysiiyay**

Dugsi la haboonaysiiyay waxaa la dhigan karaa oo keliya haddii qofku leeyahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah dhinaca caqliga. Dugsi hoos-dhexe iyo dugsi sare ee la haboonaysiiyay ayaa ilmahaagu wax ku baranayaa oo ku horumarayaa xawaare ku haboon ilmahaaga. Manhajyada iskoolada la haboonaysiiyay waxay si cad xooga u saaraan aqoonta.

## **Iskool gaar ah**

Nooc ah qaab kale oo iskool waa iskoolka gaarka ah. Iskoolka gaarka ah waxaa loogu talagalay ilmaha leh hal ama dhowr ka mid ah hoos u dhacyada awoodda ee soo socda:

- **hoos u dhac maqalka ah**
- **dhego la'aan**
- **dhego iyo indho la'aan**
- **hoos u dhac aragtida ah iyo hoos u dhac dheeraad ah dhanka awoodda laxaadka**
- **dhibaato luqad aad u weyn**

Waa Waxbarashada gaarka ah ee hey'adda dawladda ee iskoolada ta go'aamisa qofka loo oggolyahay  
\*iskool gaar ah.

## **Waxbarasho ku haboon Rh**

Nooc kale oo qaab iskool waa waxbarasho ku haboon Rh taas oo loogu talagalay dhalinyarada leh caqabado dhaqdhaqaaq oo aad u baahsan. Waxbarashada ku haboon Rh waxay ku taalaa afar dugsi sare oo dalka ah taas oo micnaheedu tahay in iskooladaas ay qaabilaan

codsadayaasha ka yimi dalka oo dhan.  
Waa Waxbarashada gaarka ah ee hey'adda  
dawladda ee iskoolada ta go'aamisa qofka loo  
oggolyahay Waxbarashada ku haboon Rh.

### **Taageero gudaha iskoolka**

Waxaa dhinaca iskoolka ka jirta taageero kala duwan  
dhanka carruurta leh hoos u dhac awoodda laxaadka  
ah. Waa maamulaha iskoolka qofka go'aaminaya  
haddii ilmahaagu heli doono taageero iyo in kale.

#### **Taageerada carruurta leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah ee gudaha iskoolka:**

- **Alaab waxbarasho oo haboon** – Barnaamij kombiyuutar, buug leh cod, buug leh farta indhoolayaasha
- **Jadwal haboon** – Jadwal ku haboon baahida ilmahaaga
- **Caawiye arday** – Qof ardayda ka taageera waxbarashada
- **Xiriirka** – Luqadda dhagoolayaasha, taageero dhinaca xiriirka lehna calaamado iyo sawiro
- **Taageero laga helo guddida caafimaadka ardayda** – Adigu waxaad caawin ka heli kartaa dhakhtar iskool, takhasuska cilmi-nafsiga ee iskoolka, kalkaalisada caafimaad ee iskoolka, la taliye iyo macallin takhasus ah. Iyagu waxay u joogaan in ilmahaagu dareemo wanaag oo helo caawinta loo baahdo si loo dabaro iskoolka sida ugu fiican ee suurtagal ah
- **Gaadiidka** – Gaadiid ku tegista iyo ka imaanshaha iskoolka

# Xeerka qaxootiga badan

## Qofkee ayaa ah codsade gabood si waafaqsan xeerka qaxootiga badan?

Waxaad tahay codsade gabood haddii sharci degganaansho lagu siiyay si waafaqsan Midowga Yurub xeerkeeda qaxootiga badan. Xilliga imminka waxaa Midowga Yurub waxay go'aamiyeen in la hawl-galiyo xeerka qaxootiga badan ee loogu talagalay dadka ka yimi Yuukrayn.



### Shaqo

Gabood codsade ahaan waa inaad is masruufto haddii aad awooddo. Taas waxaad samayn kartaa adigoo adeegsanaya lacagtaada kaydka ama dhinaca inaad shaqayso.

Waxaad u baahantahay Hey'adda Socdaalka ka hesho caddayn muujinaysa in lagu oggolyahay inaad ka shaqayso dalka Iswiidhan. Marka aad sharci degganaansho ku hesho xeerka qaxootiga badan waxaa ku qornaan doonta kaadhkaaga sharciga degganaansho in aad xaq u leedahay inaad shaqayso. Waxaad u baahantahay lambarka isku dubba-ridka. Haddii aad dukumentiyiyo aqoonsi tustay Hey'adda Socdaalka waxay iyagu ka codsan doonaan Hey'adda Cashuuraha inay ku siiyaan ambarka isku dubba-ridka.

Keligaa ayaad shaqo diyaarsan kartaa. Haddii aad rabtid caawinta inaad hesho shaqo waxaad iska diiwaan-gelin kartaa Xafiiska Shaqada. Waxaad iska diiwaan-gelin kartaa adiga oo u mara inaad tagto Dawladda xarunteeda adeegga. Ka dib ayaad imanaysaa wada hadal qorsheyn oo aad la yeelato hawl-wadeen. Sheeg inaad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah si aad u hesho taageero sax ah. Waa Xafiiska Shaqada meesha go'aamisa haddii aad xaq u leedahay taageero.

### **Taageero iyo kaalmo aad ka heli karto Xafiiska Shaqada:**

- **Qof ku taageera** – Qof kaa caawinaya inaad hesho shaqo kugu haboon iyo qorista codsiga shaqo
- **La kulanka takhasus** – Haddii ay kugu adagtahay inaad wax aragto, maqasho ama hadasho waxaad taageero ka heli kartaa takhasus
- **Mushahaaro kaalmo ah** – Haddii aad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah waxaad heli kartaa shaqo ku haboon xaaladahaaga. Isla markaana meesha aad u shaqayso ayaa kaalmo ku helaysa inay sameeyaan waafajintaas





## Hoy

Codsade magan-gelyo ahaan waxaad xaq u leedahay inaad codsato hoy haboon haddii aad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah. Haddii aad rabto caawinta inaad hesho hoy waxaa Hey'adda Socdaalka ogaan kartaa degmada kuu haysa boos oo ka codsan kartaa degmadaas inay diyaariso hoy. Inta lagu jiro wakhtiga aad sugayso waxaad ku noolaan kartaa mid ka mid ah Hey'adda Socdaalka hoygeeda ku meel gaarka ah. Waa inaad ugu horeyn adigu iska bixiso lacagta hoygaaga. Haddii aanad haysan wax lacag ah markaas Hey'adda Socdaalka ayaa bixin karta lacagta hoygaaga. Haddii aad diido hoyga lagugu casuumay ee ku yaal degmo markaas la xiriir Hey'adda Socdaalka si lagaaga caawiyo hoyga. Haddii aad diido casuumidaas waa inaad diiyaarsato oo keligaa iska bixiso lacagta hoyga.

## **Carruurta iyo dhalinyarada ka yar 18 jir ee ah bilaa waalid**

Haddii aad ka yartahay 18 jir oo aad timi Iswiidhan adigoo bilaa waalid ah markaas degmada aad ku nooshahay ayaa diyaarinaysa hoy ku haboon baahiyahaaga.



## Lacag dhaqaale ah

Haddii aanad is masruufi karin waxaad fursad u haysataa inaad taageero ka codsato Hey'adda Socdaalka sida waafaqsan Sharciga qaabilaadda

magan-gelyo doonka (LMA). Haddii taageerada aad ka hesho Hey'adda Socdaalka aanay kugu filnayn waxaad codsan Hey'adda socdaalka ka codsan kartaa taageero gaar ah:

- Haddii aad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah oo taageerada kale aanay kugu filnayn waxaad codsan kartaa kaalmo gaar ah, tusaale ahaan muraayadaha indhaha ama qalabka caawinta.

La xidhiidh Hey'adda Socdaalka si aad u codsato taageerooyinka kala duwan oo aad u hesho warbixin dheeraad ah. Waa Hey'adda Socdaalka ta go'aamisa haddii aad heli karto lacag.

### **Carruurta iyo dhalinyarada ka yar 18 jir ee ah bilaa waalid**

Haddii aad ka yartahay 18 jir oo aad timi Iswiidhan adigoo bilaa waalid ah markaas waxaa ku khuseeya qawaaniin la mid ah sida dhammaan caruurta iyo dhalinyarada kale ee u baahan taageero iyo ilaalin.



### **Daryeelka caafimaadka iyo bukaanka iyo daryeelka ilkaha**

Dalka Iswiidhan waa ugu horeyn gobolada kuwa mas'uul ka ah daryeelka caafimaadka iyo bukaanka iyo daryeelka ilkaha.

Marka aad timaado Iswiidhan ayaa rugta caafimaadka ugu casuumaysaa baaritaan caafimaad. Baaritaankan wuxuu keenayaa inaad caawimaad wakhti hore ka hesho daryeelka bukaanka haddii

aad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka. U sheeg daryeelka bukaanka haddii aad leedahay ama u malaynayso inaad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah si aad u hesho taageerada aad u baahantahay. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo turjubaanada waxaa waajib ku ah xog qarinta sirta oo ma loo oggola inay hey'addaha dawladeed ee kale u sheegaan inaad booqatay daryeelka caafimaadka. Waxa aad sheegto micnihii raad ma ku yeelanayso codsigaaga magan-gelyo. Qof weyn ahaan waxaa siinayaa daryeelka caafimaad iyo daryeelka ilko ee aan la sugi karin.

### **Halka aad la xiriirayso haddii aad bukooto**

La xiriir ugu horeyn rugta caafimaad ee ugu dhow haddii aad bukooto. Rugta caafimaadka ayaad ka heli kartaa caawimaada dhanka daryeel fudud. Wac 1177 haddii rugtaada caafimaadka xirantahay ama aad ku weydo telafoonka. Markaas ayaad la hadlaysaa kalkaaliye caafimaad oo ku siin kara talooyin. La xiriir Daryeelka ilkaha ama rug dhakhtar ilko oo kale haddii aad u baahantahay daryeel ilko. Isbitaalka waxaad la xiriiraysaa haddii aad si degdeg ah u bukooto. Wac 112 haddii adiga ama qof kale si halis ah u bukoodo, dhaawac xun jiro oo loo baahdo ambalaans.

### **Safarka bukaanka**

Haddii ay dhib kugu tahay inaad keligaa tagto daryeelka caafimaadka waxaad ballansan kartaa oo aad helaysaa magdhabidda safar bukaan oo

lagu aado rug caafimaad ama isbitaal. Waxaad magdhowga codsanaysaa ka dib, laakiinse waxaad u baahantahay inaad ka hor sii codsato oggolaanshaha safarka bukaanka. La xiriir daryeel bixiyahaaga si aad u ogaato nooca safarada aad ku heli karto magdhow.

### **Carruurta iyo dhalinyarada ka yar 18 jir**

Carruurta ka yar 18 jir waxay xaq u leeyihiin dhammaan daryeel bukaan iyo daryeel ilko. Adigaaga ka yar 18 jir waxaad xitaa heli kartaa baxnaanis, taas oo micnaheedu tahay taageero iyo tababar si aad u dabari karto nolosha maalinlaha ah sida ugu fiican ee suurtagal ah. La xiriir rugtaada caafimaada si aad ula xiriirto baxnaaniska.



### **Iskoolka**

Dalka Iswiidhan iskoolku waa u bilaash dhammaan carruurta iyo ardayda. Carruurta dadka codsaday sharciga xeerka qaxootiga badan waxay xaq u leeyihiin inay dhigtaan iskool laakiin ma ku aha khasab. La xiriir degmadaada si aad boos iskool ugu hesho ilmahaaga.

Adiga ayaa ilmahaaga u dooran kara iskool ku yaal degmada aad ku nooshahay. Hey'adda Socdaalka ayaa ku caawin karta haddii aad u baahantahay in lagaa caawiyo inaad ilmahaaga qorto iskoolka. Iskoolka ayaa go'aaminaya fasalka ilmahaagu bilaabay. Tani waxay ku xirantahay da'da ilmahaaga iyo aqoonta hore.

Badankooda ardayda leh hoos u dhac ah awoodda

laxaadka ee jir ahaan, maskax ahaan iyo caqli ahaan waxaa lagu qaabilaa dugsiga hoose-dhexe iyo ka sare ee caadiga ah. Waxa xitaa jira qaabab iskool oo kale looguna talagalay carruurta leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah.

### **Dugsi hoos-dhexe iyo dugsi sare oo la haboonaysiiyay**

Dugsi la haboonaysiiyay waxaa la dhigan karaa oo keliya haddii qofku leeyahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah dhinaca caqliga. Dugsi hoos-dhexe iyo dugsiga sare ee la haboonaysiiyay ayaa ilmahaagu wax ku baranayaa oo ku horumarayaa xawaare ku haboon ilmahaaga. Manhajyada iskoolada la haboonaysiiyay waxay si cad xooga u saaraan aqoonta.

### **Iskool gaar ah**

Nooc ah qaab kale oo iskool waa iskoolka gaarka ah. Iskoolka gaarka ah waxaa loogu talagalay ilmo leh hal ama dhowr ka mid ah hoos u dhacyada awoodda ee soo socda:

- **hoos u dhac maqalka ah**
- **dhego la'aan**
- **dhego iyo indho la'aan**
- **hoos u dhac aragtida ah iyo hoos u dhac dheeraad ah dhanka awoodda laxaadka**
- **dhibaato luqad aad u weyn.**

Waa Waxbarashada gaarka ah ee hey'adda dawladda ee iskoolada ta go'aamisa qofka loo oggolyahay iskool gaar ah.

## **Waxbarasho ku haboon Rh**

Nooc kale oo qaab iskool waa waxbarasho ku haboon Rh taas oo loogu talagalay dhalinyarada leh caqabado dhaqdhaqaaq oo aad u baahsan. Waxbarashada ku haboon Rh waxay ku taalaa afar dugsi sare oo dalka ah, taas oo micnaheedu tahay in iskooladaas ay qaabilaan codsabayaasha ka yimi dalka oo dhan.

Waa Waxbarashada gaarka ah ee hey'adda dawladda ee iskoolada ta go'aamisa qofka loo oggolyahay Waxbarashada ku haboon Rh.

## **Taageero gudaha iskoolka**

Waxaa dhinaca iskoolka ka jirta taageero kala duwan dhanka carruurta leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah. Waa maamulaha iskoolka qofka go'aaminaya haddii ilmahaagu heli doono taageero iyo in kale.

## **Taageerada carruurta leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah ee gudaha iskoolka:**

- **Alaab waxbarasho oo haboon**– Barnaamij kombiyuutar, buug leh cod, buug leh farta indhoolayaasha
- **Jadwal haboon** – Jadwal ku haboon baahida ilmahaaga
- **Caawiye arday** – Qof ardayda ka taageera waxbarashada
- **Xiriirka** – Luqadda dhagoolayaasha, taageero dhinaca xiriirka lehna calaamado iyo sawiro
- **Taageero laga helo guddida caafimaadka ardayda** – Caawin laga helo dhakhtar iskool, takhasuska cilmi-nafsiiga ee iskoolka, kalkaalisada caafimaad ee iskoolka, la taliye iyo macallin takhasus ah. Iyagu waxay u joogaan in ilmahaagu dareemo wanaag oo helo caawinta loo baahdo si loo dabaro iskoolka sida ugu fiican ee suurtagal ah
- **Gaadiidka** – Gaadiid ku tegista iyo ka imaanshaha iskoolka

**Dalka ku cusub**



## Yaa ah qof dalka ku cusub?

Waxaad tahay qof dalka ku cusub marka aad hesho sharciga degganaansho ee Iswiidhan ee lagugu qaabilay degmo.

Sharci degganaansho wuxuu ahaan karaa:

- **Ku meel gaar:** Markaas sharcigaas wuxuu ansax yahay tiro bilo ah oo cayiman ama hal sano
- **Joogto:** Markaas sharcigaas wuxuu ansax bilaa wakhti xadaysan

Marka aad ogaato inaad heshay sharci degganaansho waa inaad lambarka shakhsiga ah ka codsato Hey'adda Cashuuraha. Si aad u awooddo inaad codsato lambarka shakhsiga ah waa inaad haysataa sharci degganaansho oo waaraya ugu yaraan hal sano. Ka dib ayaa Hey'adda Cashuuraha kaa caawin kartaa codsiga kaar aqoonsi, kaas oo muujinaya qofka aad tahay.



## Shaqo

Adigaaga haysta sharci degganaansho waxaad xaq u leedahay inaad ka shaqayso Iswiidhan. Haddii aanad shaqo keligaa diyaarsan karin waa inaad la xiriirto Xafiiska Shaqada oo kaa caawinaya inaad raadiso shaqo. Waxaad iska diiwaan-gelin kartaa Xafiiska Shaqada iyadoo aad u marayso inaad tagto Dawladda xarunteeda adeegga ama aad aqoonsiga

elaktarooniga ah ku gasho boggooda intarnatka. Si Xafiiska Shaqada u awoodo inay ku caawiyaan waa inaad tusto kaarkaaga sharciga degganaansho. Xafiiska Shaqada ayaa qoraya inaad tahay shaqo raadiye. Ka dib ayaad ballansan kartaa wada hadal aad la yeelato hawl-wadeen shaqo si aad wadajir u qorshaysaan talaabada ku xigta. Markaas ayaad u sheegaysaa inaad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah si aad u hesho taageero sax ah. Ka dib ayaa adiga iyo hawl-wadeenka shaqo si wadajir ah u samaynaysaan qorshe ah hawlo. Hawlahaas siyaabo kala duwan ayay u eekaan karaan iyadoo ku xiran xaaladaada. Haddii aanad shaqayn karin waxaad xaq u yeelan kartaa gunno dhaqaale ah si aad u dabarto nolashaada maalinlaha ah. Taageeradan waxay tusaale ahaan ka iman kartaa Xafiiska Shaqada, Qasnadda Caymiska ama degmadaada. Waa hey'addahaas dawladeed kuwa go'aamiya haddii aad xaq u leedahay taageero.

## **Taageerada iyo kaalmada loogu talagalay adigaaga leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah ee haysta ama raadinaya shaqo:**

- **Dad takhasus ah** – Haddii ay kugu adagtahay inaad wax aragto, maqasho ama hadasho waxaad taageero ka heli kartaa takhasus
- **Luqadda dhagoolayaasha**
- **Qof ku taageera** – Taageero dheeraad ah in la raadiyo shaqo, tusaale ahaan caawinta in la qorto codsi shaqo
- **Mushahaaro kaalmo ah** – Haddii aad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah waxaad heli kartaa shaqo ku haboon xaaladahaaga. Isla markaana meesha aad u shaqayso ayaa kaalmo ku helaya inay sameeyaan waafajintaas



## Hoy

Markaad tahay qof dalka ku cusub waxaad xaq u leedahay inaad codsato hoy haboon haddii aad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah. Waxaa jira hoy si gaar ah ugu haboon adigaaga leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah ee aan keligaa diyaarsan karin hoy. Mararka qaarkood waxaad u baahan kartaa inaad sugto si aad u hesho hoygaaga.

Sidan ayay u dhici kartaa marka aad hesho hoy haddii aad horey u ahayd magan-gelyo doon, keligaa nooshahay oo aanad keli ahaantaa heil karin hoy:

- marka aad hesho sharcigaaga degganaansho ayaa Hey'adda Socdaalka rabtaa inay kula yeelato wada hadal ku saabsan hoygaaga
- Hey'adda Socdaalka ayaa kuu sheegaysa degmada aad ku noolaan doonto
- degmadaas ayaa kugu casuumaysa hoy
- haddii aad diido badanaaba ma helaysid casuumaad cusub, laakiin waxaa jira xaalado ka reeban.

Nooca hoy ee aad heli karto waxay ku xirantahay xaaladaada. La xiriir degmadaada si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.



## Lacag dhaqaale ah iyo taageero

Adigaaga ah qof dalka ku cusub waa inaad is masruufto haddii aad awooddo. Waxaad xaq u leedahay taageero iyo kaalmo si aad ugu noolaato nolol fiican. Qasnadda Caymiska waxaa laga helaa lacago kala duwan oo laga codsado. La xiriir Qasnadda Caymiska ama Dawladda xarunteeda adeegga si aad u ogaato nooca taageero ee aad adigu heli karto.

### Tusaale ah lacagaha Qasnadda Caymiska:

- **Gunnada saldhigashada** – Gunno loogu talagalay adigaaga ku jira barnaamijka la qabsashada dalka ee Xafiiska Shaqada
- **Gunnada kharashka deeraadka ah** – Gunno loogu talagalay adigaaga leh kharashyo ay sabab u tahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah
- **Gunnada kharashka deeraadka ah ee carruurta** – Gunno loogu talagalay adigaaga leh kharashyo ay sabab u tahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah ee ilmahaaga
- **Kaalmada daryeelka** – Gunno loogu talagalay adigaaga haysta ilmo leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah.



## Daryeelka caafimaadka iyo bukaanka iyo daryeelka ilkaha

Adigaaga ah qof dalka ku cusub waxaad xaq u leedahay daryeelka caafimaadka iyo bukaanka. Waa gobolada kuwa mas'uulka ka ah daryeelka caafimaadka iyo bukaanka ee dalka Iswiidhan. Xitaa degmadu waxay kugu casuumi kartaa daryeel caafimaad iyo bukaan ah mid cayiman.

Gobolku wuxuu bixiyaa waxyaabo ay ka mid yihiin:

- **baxnaaniska iyo baanasho** – taageero iyo tababar si loo dabari karo nolosha maalinlaha ah sida ugu fiican ee suurtagal ah
- **alaab caawin** – tusaale ahaan qalab maqal iyo qalabka caawinta socodka.

U sheeg daryeelka bukaanka haddii aad leedahay ama u malaynayso inaad leedahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah si aad u hesho taageerada aad u baahantahay. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo turjubaanada waxaa waajib ku ah xog qarinta sirta oo ma loo oggola inay hey'addaha dawladeed ee kale u sheegaan inaad booqatay daryeelka caafimaadka.

Waxaad xitaa xaq u leedahay daryeel ilko. Adiga ayaa iska bixinaya lacagta daryeelka ilkaha. Haddii aad u baahato caawimaad inaad bixiso lacagta waxaad taageero dhaqaale ka codsan kartaa Qasnadda Caymiska.

## **Halka aad la xiriirayso haddii aad bukooto**

La xiriir ugu horeyn rugtaada caafimaadka haddii aad bukooto. Rugta caafimaadka ayaad ka heli kartaa caawimaada dhanka daryeel fudud. Wac 1177 haddii rugtaada caafimaadka xirantahay ama aad ku weydo telafoonka. Markaas ayaad la hadlaysaa kalkaaliye caafimaad oo ku siin kara talooyin. La xiriir Daryeelka ilkaha ama rug dhakhtar ilko oo kale haddii aad u baahantahay daryeel ilko. Isbitaal waxaad la xiriiraysaa haddii aad si degdeg ah u bukooto. Wac 112 haddii adiga ama qof kale si halis ah u bukoodo, dhaawac xun jiro oo loo baahdo ambalaans.

## **Safarka bukaanka**

Haddii ay dhib kugu tahay inaad keligaa tagto daryeelka caafimaadka waxaad ballansan kartaa safarka bukaanka oo aad helaysaa magdhabidda safar bukaan oo lagu aado rug caafimaad ama isbitaal. Waxaad magdhowga codsanaysaa ka dib, laakiinse waxaad u baahantahay inaad ka hor sii codsato oggolaanshaha safarka bukaanka. La xiriir daryeel bixiyahaaga si aad u ogaato nooca safarada aad ku heli karto magdhow.



## Iskoolka

Dalka Iswiidhan iskoolku waa u bilaash dhammaan carruurta iyo ardayda. Carruurta dalka ku cusub waa inay dhigtaan dugsiga hoose-dhexe.

La xiriir degmadaada si aad boos iskool ugu hesho ilmahaaga.

Adiga ayaa ilmahaaga u dooran kara iskool ku yaal degmada aad ku nooshahay. Iskoolka ayaa go'aaminaya fasalka ilmahaagu bilaabay.

Tani waxay ku xirantahay da'da ilmahaaga iyo aqoonta hore.

Badankooda ardayda leh hoos u dhac ah awoodda laxaadka ee jir ahaan, maskax ahaan iyo caqli ahaan waxaa lagu qaabilaa dugsiga hoose-dhexe iyo ka sare ee caadiga ah. Waxa xitaa jira qaabab iskool oo kale looguna talagalay carruurta leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah.

## **Dugsi hoos-dhexe iyo dugsi sare oo la haboonaysiiyay**

Dugsi la haboonaysiiyay waxaa la dhigan karaa oo keliya haddii qofku leeyahay hoos u dhac awoodda laxaadka ah dhinaca caqliga. Dugsi hoos-dhexe iyo dugsiga sare ee la haboonaysiiyay ayaa ilmahaagu wax ku baranayaa oo ku horumarayaa xawaare ku haboon ilmahaaga. Manhajyada iskoolada la haboonaysiiyay waxay si cad xooga u saaraan aqoonta.



## **Iskool gaar ah**

Nooc ah qaab kale oo iskool waa iskoolka gaarka ah. Iskoolka gaarka ah waxaa loogu talagalay ilmaha leh hal ama dhowr ka mid ah hoos u dhacyada awoodda ee soo socda:

- **hoos u dhac maqalka ah**
- **dhego la'aan**
- **dhego iyo indho la'aan**
- **hoos u dhac aragtida ah iyo hoos u dhac dheeraad ah dhanka awoodda laxaadka**
- **dhibaato luqad aad u weyn.**

Waa Waxbarashada gaarka ah ee hey'adda dawladda ee iskoolada ta go'aamisa qofka loo oggolyahay iskool gaar ah.

## **Waxbarasho ku haboon Rh**

Nooc kale oo qaab iskool waa waxbarasho ku haboon Rh taas oo loogu talagalay dhalinyarada leh caqabado dhaqdhaqaaq oo aad u baahsan. Waxbarashada ku haboon Rh waxay ku taalaa afar dugsi sare oo dalka ah, taas oo micnaheedu tahay in iskooladaas ay qaabilaan codsadyaasha ka yimi dalka oo dhan.

Waa Waxbarashada gaarka ah ee hey'adda dawladda ee iskoolada ta go'aamisa qofka loo oggolyahay Waxbarashada ku haboon Rh.

## **Iswiidhishka loogu talagalay ajnabiga (SFI)**

Dadka waaweyn waxay helayaan Iswiidhishka loogu talagalay ajnabiga (SFI). Waa waxbarasho aasaasi ah dhinaca luqadda Iswiidhishka ah. La xiriir degmadaada si aad u ogaato wixii dheeraad ah.

## **Taageero gudaha iskoolka**

Waxaa dhinaca iskoolka ka jirta taageero kala duwan dhanka carruurta leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah. Waa maamulaha iskoolka qofka go'aaminaya haddii ilmahaagu uu heli doono taageero iyo in kale.

## **Taageerada carruurta leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah ee gudaha iskoolka:**

- **Alaab waxbarasho oo haboon** – Barnaamij kombiyuutar, buug leh cod, buug leh farta indhoolayaasha
- **Jadwal haboon** – Jadwal ku haboon baahida ilmahaaga
- **Caawiye arday** – Qof ardayda ka taageera waxbarashada
- **Xiriirka** – Luqadda dhagoolayaasha, taageero dhinaca xiriirka lehna calaamado iyo sawiro
- **Taageero laga helo guddida caafimaadka ardayda** – Adigu waxaad caawin ka heli kartaa dhakhtar iskool, takhasuska cilmi-nafsiga ee iskoolka, kalkaalisada caafimaad ee iskoolka, la taliye iyo macallin takhasus ah. Iyagu waxay u joogaan in ilmahaagu dareemo wanaag oo helo caawinta loo baahdo si loo dabaro iskoolka sida ugu fiican ee suurtagal ah
- **Gaadiidka** – Gaadiid ku tegista iyo ka imaanshaha iskoolka

## **Sharciga taageerada iyo adeegga ee dadka awooddoodu xannibantahay qaarkood (LSS)**

Dalka Iswiidhan waxaa ka jira sharci lagu magacaabo Sharciga taageerada iyo adeegga ee dadka awooddoodu xannibantahay qaarkood (LSS).

Sharcigan ayaa adigaaga leh hoos u dhac awoodda laxaadka ah ku siin kara fursadda taageero iyo caawin haddii aad u baahato taas. Waxay ku saabsanaan kartaa taageero ah qaabka hoy haboon ama qof kale oo kaa caawiya noloshu maalinlaha ah. Si looga faa'idaysto LSS waa inaad ku jirtaa diiwaan-gelinta dadweynaha oo aad leedahay nooc ah hoos u dhac awoodda laxaadka ah. LSS waxay ka kooban tahay tobban nooc oo taageer iyo adeeg kala duwan ah oo aad codsan karto. Maaha wax hubaal ah in aad heli doonto taageerada aad codsatay. La xiriir degmadaada si aad u ogaato haddii aad xaq u leedahay LSS iyo in kale.

Si aad u hesho taageero iyo adeeg waafaqsan LSS waa inaad adigu soo dirto codsi. Meesha aad u dirayso codsiga waxay ku xirantahay nooca taageero ee aad codsanayso. Haddii shaki kaaga jiro waxa adiga ku khuseeya – la xiriir degmadaada si aad u ogaato waxa ansax ka ah meesha aad adigu ku nooshahay.

## **Waa kuwan taageerooyinka aad codsan karto:**

- Talo-bixin iyo taageero shakhsiyana ah
- Caawiye gaar ah
- Adeegga wehelka ah
- Qof lala xiriiro
- Culeys ka qaadid guriga gudihiisa ah
- Wakhti kooban oo la soo joogo meel ka baxsan guriga
- Ka warhayn wakhti kooban oo loogu talagalay ardayda iskool ee ka weyn 12 jir
- Hoyga guri qoys ama hoy leh adeeg gaar u ah carruurta iyo dhalinyarada
- Hoy leh adeeg gaar u ah dadka waaweyn ama hoy kale oo si gaar ah loo haboonaysiiyay
- Hawsha maalintii ee dadka ah da'da shaqayn kara

## Xiriir iyo la isticmaali karo

Adigaaga ku cusub Iswiidhan waxaad macluumaad dheeraad ah ka helaysaa xiriiryadan:

<b>Urur</b>	<b>Bog intarnat</b>
<b>Independent living</b>	<a href="http://independentliving.org">independentliving.org</a>
<b>Refugee welcome</b>	<a href="http://refugeeswelcomestockholm.se">refugeeswelcomestockholm.se</a>
<b>Information Sverige</b>	<a href="http://informationsverige.se/sv/">informationsverige.se/sv/</a>

Haddii aad ku jirto xaalad ah dagaal ama dhibaato waxaad booqan kartaa boggagan intarnatka si aad u hesho taageero ah sida aad uga bixi karto xaaladaada.

<b>Urur</b>	<b>Bog intarnat</b>
<b>Wakiilka arrimaha takoorka</b>	do.se
<b>Golaha – Haweenka iyo Hoos u dhaca awoodda laxaadka</b>	kvinnor-funktionshinder.se
<b>Ragga dagaalka ay ku hayaan haweenka</b>	jamstalldhetsmyndigheten.se/ mans-vald-mot-kvinnor
<b>Heeganka haweenka ee qaran iyo taageero dhinaca luqadda dhagoolayaasha ah</b>	nkjt.se
<b>Taageero wada hadal loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada oo ah luqadda dhagoolayaasha</b>	boujt.se

Daabacaadan waxaa diyaarisay Myndigheten för delaktighet oo wada shaqay kala yeelatay Migrationsverket, Funktionsrätt Sverige, Independent Living Institute, Disabled Refugees Welcome iyo Newcomers with Disabilities in Sweden. Hawshan waxaa xitaa aqoon ku kaalmeeyay Försäkringskassan, Jämställdhetsmyndigheten iyo Barnombudsmannen. Skolverket iyo Specialpedagogiska skolmyndigheten ayaa hubiyay nuxurka.



Myndigheten för  
delaktighet



Independent  
Living Institute  
[independentliving.org](http://independentliving.org)



Migrationsverket



Funktionsrätt  
Sverige



Newcomers  
with  
Disabilities